



## Basaska beddelaya tareenada Leenka Buluuga ee METRO

JUUN 29 – AGOOSTO 19

## Laga bilaabo Isniin, Juun 29 ilaa iyo Arbaco, Agoosto 19:

Buses Basaska ayaa beddelaya tareenada mara Leenka Buluuga ee METRO inta u dhexeeya boosteejooyinka Target Field iyo Mall of America.

**OGSOONOW:** Boosteejooyinka Leenka Cagaaran ee METRO ee faras-magaalaha Minneapolis ayaa sidoo kale la saameyn doonaa inta lagu jiro qaybaha dayactirka (ka fiiri macluumaadka Leenka Cagaaran Bogga dheeraad ah).

### Mashruuca Beddelaada Jidka tareenka iyo Calaamadaha

Xagaagan, Wejiga 2aad ee mashruuca beddelida Jidka tareenka iyo Calaamadaha ayaa dhici doona, kaas oo ay ku jiri doonaan beddelka wadada iyo casriyeynta calaamadaha iyo qalabka kale ee hagaya shaqada tareenka korontada ku shaqeyaa ee Metro Transit. Casriyeynta waxay u oggolaan doontaa marin u helidda tareenada si ammaan ah oo hufan, yareynta dib u dhaca, iyo hagaajinta isku halaynta jadwalka.

Wajiga 2aad, waxaan horumarinno dhowr ah ku sameynay khibradda baska beddelka ah iyadoo lagu saleynayo war-celinta Wajiga 1aad. Waqtiyada uu qaato safarka waxay hadda noqon karaan mid 18 daqiiqo ka dhakhso badan saacadaha aan mashquulka badan jirin, iyadoo celcelis ahaan la dhimay ilaa 15 daqiiqo marka la barbar dhigo sannadkii hore.

### La soco Digniinaha Rakaabka inta lagu jiro mashruuca Beddelida Jidka Tareenka iyo Calaamadaha!

Ha la kulmin adigoona wax war ka haynin, iska qor maanta barta [metrotransit.org/alerts](https://metrotransit.org/alerts) si akhbaaraadka laguugu soo diro iimayl ama fariin ahaan!

Ama nagala soco barta X wixii ku saabsan "digniinada kaliya" oo la soo dhigo [@MT\\_MN\\_Alerts](https://twitter.com/MT_MN_Alerts), [Facebook.com/MetroTransitMN](https://facebook.com/MetroTransitMN), iyo barta [@metrotransitmnbksy](https://twitter.com/metrotransitmnbksy) si aad ula socoto xogaha ugu danbeeya.

Wixii caawimo dheeraad ah, ka wac Transit Information Center lambarka 612-373-3333.

Ka hel khariidadaha goobaha basaska ee beddelka ah iyo waxyaabo kaloo badan barta [metrotransit.org/closure](https://metrotransit.org/closure).



## RENEW THE BLUE

Mashruuca Beddelida Jidka Tareenka iyo Calaamadaha waa qayb ka mid ah Renew the Blue; isbeddel sannado badan ah oo lagu sameeyay Leenka Buluugga ah ee METRO.



Iskaga diwaangeli warside ku saabsan dhammaan mashaariicda Renew the Blue barta [metrotransit.org/track-signals](https://metrotransit.org/track-signals)



**T METRO**  
Blue Line

# Anaga ayaa kaa bixinayno!

Fiiri dhammaan fursadahaaga si aad u gaarto meesha aad u baahan tahay inaad joogto inta lagu jiro xiritaanka Leenka Buluugga ah ee METRO ee Beddelka Jidka Tareenka iyo Calamada.

## Adeegga baska beddelaya tareenka

Adeegga baska beddelka ah ayaa ka dhaqan geli doona dhammaan boosteejooyinka Leenka Buluuga ah Isniinta, Juun 29 ilaa iyo Arbacada, Agoosto 19.

Ka fiiri goobaha basaska laga raaco boosteejo kasta [metrotransit.org/closure](https://metrotransit.org/closure).

**OGSOONOW:** Adeegga baska beddelka ah ayaa ka dhaqan geli doona labada leen ee Buluuga iyo Cagaarka iyo dhammaan boosteejooyinka faras-magaalaha ee ay dhibaataadu saameysey, iyadoo la adeegsanayo hal waddo oo bas ah oo Leenka Buluuga ah inta lagu jiro laba marxaladood oo ka mid ah muddada dayactirka Juun 29 - Agoosto 19. Adeegga tareenka mara Leenka Cagaaran ee METRO wuxuu dib u bilaabi doonaa adeega faras-magaalaha laga bilaabo Luulyo 27 ilaa iyo Agoosto 15.

## Waddooyin Isku Xira/ Beddelka ah

Metro Transit waxay bixisaa dhowr waddo oo basaska isku xira iyo kuwa beddel oo la mari karo si ay kaaga caawiyaan inaad gaarto meesha aad u socoto. Waxaan kugula talineynaa inaad isticmaasho Qorsheeyaheena Safar si aad u sahamiso fursadahaaga gaadiid ama aad la xiriirto Transit Information si aad u hesho caawimaad iyada oo la adeegsanaya Chat adigoo isticmaalaya badhanka "Ma u Baahan Tahay Caawimo?" ee ku yaal dhinaca midig ee hoose ee websaydkeena, adigoo qoraal u diraya 612-444-1161, ama wacaya talefanka 612-373-3333.

Fadlan fiiri liiska boosteejooyinka soo socda ee leh waddooyinka basaska ee aadi karo faras-magaalaha Minneapolis ama Mall of America.

### Boosteejada Mall of America Transit

- *Jidanka Isku xira:* METRO D iyo Leemanka Casaanka, 54, 345, 440, 444, 495, 515, 538, 539, 540, 542, iyo 686
- *Jidka taga faras-magaalaha Mpls:* Leenka METRO D
- *Jidka tago Garoonka Diyaaradaha terminool 1 iyo faras-magaalaha St. Paul:* 54

### 30th Ave.

- *Jidka isku xiraya Mall of America iyo St. Paul:* 54

### American Blvd.

- *Jidka isku xiraya Mall of America iyo St. Paul:* 54

### Garoonka Diyaarada - Terminool 1

- *Jidka isku xiraya Mall of America iyo St. Paul:* 54

### VA Medical Center

- *Jidanka isku xiraya:* 22 iyo 440
- *Jidka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 22

## Xilli hore qorshe samayso!

- Waqtiga baska beddelka ah wuu kala duwanaan karaa safarraduna waxay qaadan doonaan waqti intii hore ka dheer. **Fadlan u qorsheeyso waqti dheeraad ah safarkaaga.**
- Waqtiyada safarka ee la qiyaasay waxaa laga heli karaa barta [metrotransit.org/track-signals-FAQ](https://metrotransit.org/track-signals-FAQ).
- Jadwalka basaska beddelka ah waxaa laga heli doonaa barta [metrotransit.org](https://metrotransit.org) - basaska beddelaya wadada tareenka oo leh NexTrip barta [metrotransit.org/nextrip](https://metrotransit.org/nextrip).

## Bixinta nooligaaga

- Macaamiisha waxaa laga rabaa inay bixiyaan nooliga marka ay soo fuulaan basaska beddelka ah.
- Albaabka hore ka soo fuul oo ku rid lacag cadaan ah sanduuqa lacagta ama isticmaal Kaarkaaga Go-To Card ama mari kaar akhriyaha.
- Ablikeeshinkeenu wuxuu kuu sahlayaa inaad lacag ku bixiso – wax badan ka ogoow halkan [metrotransit.org/app](https://metrotransit.org/app).

### 46th St.

- *Jidanka isku xiraya:* Leenka METRO A, 7, 9, 46, 74, 436, and 446
- *Jidanka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 7 iyo 9

### 38th St.

- *Jidanka isku xiraya:* 14, 22, iyo 38
- *Jidanka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 14 iyo 22

### Lake St./Midtown

- *Jidanka isku xiraya:* 27 iyo Leenka METRO B
- *Jidanka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 7

### Franklin Ave.

- *Jidanka isku xiraya:* 2, 9, 22, iyo 67
- *Jidanka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 9 iyo 22

### Cedar-Riverside

- *Jidka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 22

### West Bank (Boosteejada Leenka Cagaaran)

- *Leenka Cagaaran wuxuu halkan ku dhammaan doonaa inta lagu jiro xiritaanka Leenka Buluugga ah.* U beddeleshada/kaga beddelashada baska mara Leenka Buluugga ah halkan si aad u fuusho/uga soo tagto Leenka Cagaaran si aad u tagto St. Paul iyo si aad u aado/uga imaato Mall of America ama faras-magaalaha Minneapolis.
- *Jidanka tagaya faras-magaalaha Mpls.:* 3, 7, iyo 22

### U.S. Bank Stadium

- *Jidka tagaya Mall of America:* Leenka METRO D

### Govt. Plaza

- *Jidka tagaya Mall of America:* Leenka METRO D

### Nicollet Mall

- *Jidka tagaya Mall of America:* Leenka METRO D

### Warehouse District/Hennepin Ave.

- *Jidka tagaya Mall of America:* Leenka METRO D

### Stadium Village (Boosteejada Leenka Cagaaran)

- *Jidka tagaya faras-magaalaha Mpls:* Leenka METRO E

## Baaskiil ku wado

Waxaad ku dhax wareegi kartaa dhammaan goobta xiran ama inta u dhaxaysa boosteejooyinka haddii loo baahdo.

Basaska beddelka ah oo dhan waxay leeyihiin meel si lacag la'aan ah loogu qaato baaskiilada .



## Basaska beddelaya tareenada Leenka Buluuga ee METRO

**LUULYO 1 – 26**  
**AGOOSTO 16 – 19**

**Laga bilaabo Arbacada, Luulyo 1 ilaa iyo Axadda, Luulyo 26 iyo Axadda, Agoosto 16 ilaa iyo Arbaco, Agoosto 19:**

Basaska ayaa beddelaya tareenada mara Leenka Cagaaran ee METRO inta u dhexeysa boosteejooyinka Target Field iyo West Bank.

**Ogsoonow:** Macaamiisha isticmaala gaadiidka mara Leenka Cagaaran ee METRO waxay boosteejada West Bank ugu beddelan karaan baska mara Leenka Buluugga ah si ay ugu sii safaan galbeedka magaalada Minneapolis ama koonfurta dhanka Mall of America. **Ikhtiyaarkan lagu beddelanayo gaadiidka ayaa laga heli doonaa faras-magaalaha Minneapolis Luulyo 27 - Agoosto 15** marka adeegga Leenka Cagaaran uu dib uga bilowdo faras-magaalaha Minneapolis. Macaamiisha u safraya bari ilaa iyo St. Paul waa inay ka baxaan baska beddelka ah oo ay raacaan tareen Leenka Cagaaran.

### Wadooyinka Kale ee loogu talagalay macaamiisha Leenka Cagaaran:

**Jidka 94** wuxuu ku safraa inta u dhaxayso faras-magaalaha St. Paul iyo faras-magaalaha Minneapolis (isagoo ku istaagaya Snelling Ave.) oona leh jadwal maalinle ah iyadoo inta jeer ee uu imaado ay kordhayso waqtiyada mashquulka badan jiro.

**Leenka METRO E** waa mid si fudud looga beddelan karo boosteejada Westgate ama Stadium Village ee ku yaal Leenka Cagaaran, iyadoo si toos ah loogu tagi karo faras-magaalaha Minneapolis iyada oo loo marayo Hennepin Ave.

### La soco Digniinaha Rakaabka inta lagu jiro mashruuca Beddelida Jidka Tareenka iyo Calaamadaha!

Ha la kulmin adigoona wax war ka haynin, iska qor maanta barta [metrotransit.org/alerts](https://metrotransit.org/alerts) si akhbaaraadka laguugu soo diro iimayl ama fariin ahaan

Ama nagala soco barta X wixii ku saabsan "digniinada kaliya" oo la soo dhigo **@MT\_MN\_Alerts**, **Facebook.com/MetroTransitMN**, iyo barta **@metrotransitm.n.bsky.social** si aad ula socoto xogaha ugu danbeeya.

Wixii caawimo dheeraad ah, ka wac Transit Information Center lambarka 612-373-3333.

Ka hel khariidadaha goobaha basaska ee beddelka ah iyo waxyaabo kaloo badan barta [metrotransit.org/closure](https://metrotransit.org/closure).

